

Ururinta kaadida 24 saacadood ee shaybaadhka urate

Si shaybaadhku natiijo midho dhal ah u dhaliyo, waa in aad sidii caadiga ahayd waxna u cuntaa waxna u cabtaa hadii aan wax ka duwan amar lagugu siinin. Dhamaan kaadida la dhiiqay 24-ka saacadood waa in la uruuriyaa.

Xafiiska kuugu dhaw ee HUS ayaa kusiin doona weel aad ku uruuriso

Weel uruurin oo, 1–2 xabadood ah
Ilaaliyaha (5 % sodium hydroxide), 2 x 5 ml weelkii uruurintaba

Ogeysiis! Sodium hydroxide waa sun. Ka ilaali inaad ku daadiso indhahaaga, jidhkaaga ama dharkaaga. Ciyaalku meel ayna gaadhaynin dhig. Eeg talaabooyinka hadii wax shil ah yimaado.

Uruurin

Bilawga uruurinta ku kaadi kaadida ku haysa oo dhan suuliga (taas oo ah 7:15). KAADIDAAS LAGUMA DARAYO KAADIDA LA URUURINAYO, balse qor saacada. URURINTA WAXAY BILAABANTAY SAACADAN.

Taariikhda _____ Wakhtiga _____

1. Uruuri dhamaan kaadidaada kaa timid 24-ka saacadood oo ku kaydi weelka. Waa inaad ilaalisaa inayna kaadi daadan markaad isku rakibayso weelka. Waa in waxaad ku istijoonaysaa ama warqada aad isticmaalaysaa ama saxaaro aanay ku dhicin weelka
2. Markaad inta ugu horeysa ee kaadi ah ku hubsato weelka ku shub ilaaliyaha (2 x 5 ml) weelka.
3. Hadii aad weel labaad kaydka danbe ee kaadida ku uruurinayso waa inaad ku dartaa ilaaliyaha (2 x 5 ml) weelka.
4. Ku kaydi weelka aad kaadida ku uruurisay meel heerkula qolka leh. Waa inaan muunada la galinin talaajada.
5. Kaadidaada ku dhamaystir weelka 24-ka saacadood intaanad bilaabin ururinta kaadi cusub. Qor wakhtiga.

Taariikhda _____ Wakhtiga _____

Marka la uruuriyo kadib

Ku dhaji weelka warqad aad ku qortay magacaaga, lambarka tixraacaaga iyo saacad bilawga iyo dhamaadka uruurinta kaadida. Shaybaadhku ma baadhi karo muunad aan xog fiican wadan. Fadlan muunada keen shaybaadhka sida ugu dhakhsada badan. Haddii ay jiraan wax ka duwan tilmaamaha lagu siiyay, fadlan la socodsii qofka aad muunada ku wareejinayso.

Haddii aad wax su'aalo ah qabto, fadlan lasoo hadal HUS oo kala soo hadal lambarka
Tel. +359 (0)9 471 86800; Isn–Jum 7:30–15.30. Nasiib daro, natiijada shaybaadhka taleefan laguma bixin karo.